IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

*JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA*

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 8aad Muqdisho 29 Maarso 1980 — L. 2 R 3

*FAAFINTA BIL SOO BAXA* جريدة شهرية

*Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.*

**QIIMAHA** : waa 5 shilin lnmbar walba **RUKUNKA** : Sanalkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibedana waa Sh. So, 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qorotaanka F. R, halkii sadar iyo wàxii ka yàr wàà 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulkà Fààfintà Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuurahà ee Wàsààràddà Làcagta.

## *K O O B N I I N*

## *Q A Y B T A   K O O W A A D*

### SHARCI

SHARCI L. 8 ee 3 Feb. 1980, waxaa la meel ma-Boga riyey Dacwadaha ku saabsan Kirada Guryaha. 357

SHARCI L. 9 ee 18 Mar. 1980 Toosin iyo wax ka baddelid Sharciga horumarinta Iskaashatooyinka ee L. 40 soona baxay 4.10.1973 » 358

## QAYBTA LABAAD

### X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 46 ee 23 Maar. 1980 Cafis doonta Maxkamadda Badbaadada ka Hantiguurisay Jaalle Cabdulcasiis Yaxye Al-Kidi oo Cumaan ah » 360

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 47 ee 2 Maarso 1980, Magacaabid Maareeye Guud ee Mashruuca Gaanaha Banaadir » 361

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 48 ee 10 Febraayo 1980

XEER NIDAAMIYE LAGU FULINAYO SHARCIGA LAMB 27 EE SOO BAXAY 25. 2. 1973

MADAXWEYNAHA JDS.

ISAGOO ARKAY : Qodobka 82 (14) ee Dastuurka J. D. S.

ISAGOO ARKAY : Sharciga Lamb 27 ee 25. 2. 1973 ee ku saabsan dhismaha Wakaaladda Filimada Soomaaliyeed.

ISAGOO ARKAY : Tala soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweynaha.

ISAGOO AQOONSADAY : Baahida loo qabo in la sameeyo Xeer Nidaamiye lagu fulinayo Sharciga Lamb. 27 soona baxay 25. 2. 1973.

ISAGOO TIXGELINAYA : Taladii Garyaqaanka Guud ee Dalka J. D. S.

**WUXUU SOO SAARAYAA**

Xeer Nidaamiyaha soo socda

**QODOBKA 1AAD**

**GANACSIGA FILIMADA**

1) Wakaaladda Filimada Soomaaliyeed, kadib markii ay filimada keento, waxay kaga kiraynaysaa Shineemooyinka dalka qiimo go'an iyadoo la tixgelinayo hadba qiimaha filinka, mugga Shineemada iyo meesha Shineemadu ku taallo.

2) Lacagta kirada iyo muddada kiraynta filinka waxaa lagu xadedayaa heshiis dhexmara Wakaaladda Filimada iyo Shineemada Filinka kiraysanaysa.

**QODOBKA 2AAD**

**BAARISTA MAKIINADAHA FILIN-TUSIDDA**

1) Wakaaladda Filimadu waxay awood u leedahay inay baaris-farsamo ku samayso makiinadaha filin-tusidda

2) Haddii ay caddaato in makiinadda filin-tusidda ee Shineemadu ayan si habsami ah u shaqaynayn, Wakaaladdu waxay ka qaadi kartaa tallaabooyinka hoos ku taxan :

b) Inay amarto Maamulka Shineemada inuu makiinadda xumaatay si degdeg ah u sameeyo ama uu u beddelo si filimadu u beddelo si filimadu u nabadgalaan, daawashada dadweynuhana loo daryeelo.

t ) Haddii shineemada makiinadu ay ka xun tahay oo uu Maamulka Shineemadu fulin waayo amarka Wakaaladda Filimada, waxay Wakaaladdu awood u leedahay inay shineemadaas ka joojiso kiraynta filinka ilaa iyo inta laga hubsanayo inay fulisay amarka lagu sheegay xarafka «b» ee qaybta 3aad ee qodobkan.

## QO*D*OBKA *3*AAD

## *LUMI*NTAA*M*A *D*HAAWA*C*A FILINKA

1) Haddii ay caddaato in shineemo lumiso ama dhaawacdo filinkii ama tusmadii (provino) kireeyey, waxaa xaq loogu leeyahay inay shineemadaasi bixiso qaandhaw.

2) Qiimaha qaandhawga waxaa lagu caddaynayaa heshiis dhex-mara Wakaaladda Filimada iyo Shirkadda filinka leh ee qaandhawga doonaysa.

## QO*D*OBKA *4*AAD

## WARAAQAHA *D*ACAAYAD*DA* F*I*LIMA*DA*

1) Haddii ay dhacdo in shineemo lumiso ama ay wax gaarsiiso waraaqaha dacaayadda filinka, waxay Wakaaladda Filimadu xaq ugu leedahay inay qaandhaw ka qaadato shineemadaas.

2) Qiimaha qaandhawga waxaa lagu caddaynayaa heshiis dhexmara Wakaaladda filimada iyo Maamulka Shineemada

## QODOBKA 5AAD

## QIIMAHA GELIDDA SHINEEMOOYINKA

1) Wax-ka-beddelidda qiimaha gelidda shineemooyinka waxa tala ahaan ugu soo jeedin kara hay'ada awoodda sicir-goynta leh, guddi ka kooban :

b) Qof Wakiil ka ah Wakaaladda Filimada Soomaaliyeed (GUDOOMIYE)

t ) qof Wakiil ka ah Dawladda Hoose ee Xamar (XUBIN)
j ) Qof Wakiil ka ah Wasaaradda Maaliyadda (XUBIN)

2) Haddii loo baahdo in Wakaaladdu keento filin heer caalami ah oo qiime badan lagu soo kireystay. Guddigu wuxuu u goyn karaa sicir gaar ah oo lagu galo filinkaas.

## QODOBKA 6AAD

## LAHAANSHAHA AMA KIRAYSIGA SHINEEMO

1) Wakaaladda Filimadu waa lahaan kartaa shineemo u gaar ah waana kiraysan kartaa shineemo.

2) Wakaaladda Filimadu si ay u daryeesho danta dadweynaha waxay kaloo kiraysan kartaa shineemadii xiranta, kaddib markii uu kiraystuhu ama mulkiluhu wadi waayey shineemadaas ama uu mulkiluhu doonayo inuu ka beddelo shineemada ulajeedadii awal loogu talagalay ee ahayd maaweelinta dadweynaha.

3) Habka Wakaaladdu ku kiraysanayso shineemada waxaa lagu caddaynayaa heshiis dhaxmara Wakaaladda iyo kireeyaha.

4) Haddii lagu heshiin waayo qiimaha kirada shineemada waxaa wadajir ahaan u goynaya Dawladda Hoose ee Degmada shineemadu ku taallo, Wakaaladda Fi-

limada iyo Kireeyaha iyadoo la tixgelinayo duruufta deegaanka.

5) Baahida bulshadu u qabto shineemadaas xirantay waxaa qoraal ku muujinayaa Madaxda Degmada Shineemadu ku taallo.

### QODOBKA 7AAD

### DHAQAN GELID

Xeer Nidaamiyahan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, wuxuuna dhaqan gelayaa marka uu ku soo baxo Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 10. 2. 1980

**(JAALLE S. GAAS MAXAMED SIYAAD BARRE)**
**MADAXWEYNAHA**
**JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA**